

Jidka 6 ayaa meesha laga saarayaa



Sabtida, Diseembar 6, in dhowr isbeddel lagu sameeyo adeegga gaadiidka ayaa loo qorsheeyay in laga qabto Waddada 6.

Jidka 6 waxaa bedeli doona Leenka cusub ee METRO E, Jidka cusub ee 36 waxa uu dabooli doonaa adeegyada qaybta koonfureed ee Jidkii hore ee 6.

Adeeg Dheereeya. Marar badan la helo. Maalinta dhan shaqeeya. Adigana kuu shaqeeya. Leenka Cusub ee METRO E.


Gaadiidka mara Leenka E waxa uu dhex mari doonaa Boosteejada Westgate ee u dhow Prospect Park iyo Southdale Transit Center. Waxay badiyaa ku safri doonaan 4th Avenue ee Dinkytown, Hennepin Avenue iyagoo sii maraya bartamaha magaalada Minneapolis, iyo France Avenue.

Jidka Cusub ee 36

Jidka cusub ee 36 wuxuu ka shaqayn doonaa 30kii daqiqiba kasta Xerxes Ave. inta u dhaxaysa 78th & Johnson iyo Uptown Transit Station.


Jidka 540

Jidka 540 waa jid ay maraan baska maxalli ah oo ka baxa Mall of America oo taga xafiisyada Normandale Lake. Waxay inta badan raacdaa 76th Street. Basku wuxuu imaadaa 30 kii daqiqa kasta maalmaha shaqada iyo 30 ilaa iyo 60 daqiiqo kasta sabtida iyo axada. Gaadiidka mara Jidka 540 waxay ku safri doonaan qaybo ka mid ah Drive, 77th Street, 74th Street, iyo Cahill Road. Waxay la wareegi doonaan aagagga uu u adeegi jiray Jidka 6K. Basasku ma sii isticmaali doonaan 78th Street.





Leenka E



Ogoow farqiga u dhexeeya Jidka 36 iyo Leenka E

Jidka 6 waxa uu joojin doonaa shaqada Jimcaha, Diseembar 5, 2025. Laga bilaabo Sabtida, Diseembar 6, Leenka E waxa uu la wareegi doonaa inta badan Jidka 6, Jidka cusub ee 36 waxa uu dabooli doonaa qayb ka mid ah.

Leenka METRO E




Gaadiidka mara Leenka E waxay ku bixin doonaan adeeg dhaqsiyo badan oona leh joogsiyo yar iyo boosteejooyin kuwa kale ka wanaagsan inta u dhaxaysa Boosteejada Westgate ee u dhow Prospect Park iyo Southdale Transit Center.

Gaadiid bixiya adeeg maalin kasta

- Adeegga maalinlaha ah 10 - 12 daqiiqo kasta. inta u dhaxaysa 8 a.m. iyo 7 p.m.
- Subaxdii xilliyada hore/fiidkii xilliyada danbe: 15-30 daqiiqo kasta



Ku bixi nooligaaga boosteejada kahor intaadan fuulin gaadiidka. **Waa \$2 oo kaliya.**



SIDA LACAGTA LOO BIXIYO:

Tigidh gado: Mashiinnada tigidhada waxay ku yaalliin madasha boosteejo kasta.

Si aad tigidh u gadato:

- Riix badhanka laga shido aalada
- Dooro Buy a ticket (libso tigidh)/Use voucher (Isticmaal Foojar)
- Dooro nooca nooligaaga
- Dooro tirada tigidhada aad rabto
- Ku dar qaybta wax iibsiga
- Dooro + ADD MORE (KUWO KALE KU DARSO) si aad ugu darsato tigidho dheeraad ah
- Dooro Check Out (Lacag bixinta) ama Ku darso tigidh kale
- Dooro Pay with cash, credit card, or coupon (Ku bixi lacag cadaan ah, kiridhit kaar, ama foojarka qiima dhimista wato)
- Lacagta bixi
 - Cadaan - Inta la iska rabo oo kaliya bixi
 - Kiridhit kaar – Kaar oo dhan gali, sug, kana soo baxso marka laguu sheego inaad sidaas samayso
 - Foojarka wato qiima dhimista – Wuxuu ku fiican yahay markaad hal tigidh oo kaliya aad gadanayso

Kaarka Go-To Card: Mashiinta akhriso kaarka taabsii kaarkaaga kahor intaadan fuulin gaadiidka.

Ablikeeshinka: Isticmaal ablikeeshinka Metro Transit inaad ku bixiso nooligaaga. Ka soo degso ablikeeshinka barta metrotransit.org/app.



Astaamaha boosteejada

Hoyga leh kulayl iyo iftiin, calaamada NexTrip oo waqtiga-dhabta sheegaya, kuraas, mishiinnada tigidhada, mashiinada akhriya Kaadhka Go-To Card, kamirooyinka amniga, taleefannada loo adeegsado xaaladaha degdegga, iyo weelasha qashinka lagu rido.

Wixii tafaasiil ah, wac 612-373-3333 ama booqo metrotransit.org/E-Line-Project

Jidka 36



Jidka 36 wuxuu u adeegaa joogsiyo badan inta u dhaxaysa 78th & Johnson iyo Uptown Transit Station.

Adeeggu waxa uu shaqeeyaa 30kii daqiiqoba mar.



Waxaad nooliga bixini markaad fuusho baska, si lamid ah Jidka 6. Waa \$2 oo kaliya.



SIDA LACAGTA LOO BIXIYO:

Kaarka Go-To Card: Mashiinta akhriso kaarka taabsii kaarkaaga markaad fuulayso gaadiidka.

Ablikeeshinka: Isticmaal ablikeeshinka Metro Transit inaad ku bixiso nooligaaga. Ka soo degso ablikeeshinka barta metrotransit.org/app.

Cadaan: Geli lacagtaada sanduuqa lagu rido lacagta nooliga oo laga helayo dhinaca darawalka. Sanduuqa nooliga lagu rido waxay aqbalaan biilasha dollarka, qadaadiicda ama boonooyinka, laakiin sarif lama heli karo.

Astaamaha Joogsiga Baska:

Joogsiyada qaar waxay leeyihiin calaamad kaliya, laakiin joogsiyada mashquulka badan waxay sidoo kale yeelan karaan hoy.

Wixii tafaasiil ah, wac 612-373-3333 ama booqo metrotransit.org/Route-36

